# DASTUURKA DOWLADDA KOONFURGALBEED SOOMAALIYA

La ansixiyey

**27 February 2024**

NUQULKA CUSUB

**DASTUURKA KMG**

Baidoa , Somalia

## Tusmo

**ARAR** ........ IX

**CUTUBKA 1AAD: MABAADI'DA GUUD** ........ 1

QODOBKA 1AAD: MAGACA DOWLADDA ........ 1
QODOBKA 2AAD: DHULKA IYO SOOHDIMAHA DOWLADDA KOONFURGALBEED ........ 1
QODOBKA 3AAD: DIINTA ........ 1
QODOBKA 4AAD: MABAADI'DA AASAASIGA AH ........ 2
QODOBKA 5AAD: SARREYNTA SHARCIGA ........ 3
QODOBKA 6AAD: AFAFKA RASMIGA AH ........ 3
QODOBKA 7AAD: CALANKA IYO ASTAANTA DOWLADDA KOONFURGALBEED. ........ 4
QODOBKA 8AAD: MAGAALO MADAXDA DOWLADDA KOONFURGALBEED. ........ 5

**CUTUBKA 2AAD: XUQUUQDA, XURIYAADKA AASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADINKA** ........ 6

QODOBKA 9AAD: KARAAMADA AADANAHA ........ 6
QODOBKA 10AAD: SINNAANTA BULSHADA ........ 6
QODOBKA 11AAD: XURIYADDA CAQIIDADA ........ 7
QODOBKA 12AAD: XURIYADDA FIKIRKA ........ 7
QODOBKA 13AAD: XAQA DOORASHADA ........ 7
QODOBKA 14AAD: XAQA ARJI QOROSHADA ........ 8
QODOBKA15AAD: XAQA KA MID NOQOSHADA URURADA ........ 8
QODOBKA 16AAD: XURIYADDA DHAQDHAQAAQA ........ 8

QODOBKA 17AAD: XAQA LAHAANSHAHA GAAR AHAANEED. .. 9
QODOBKA 18AAD: XAQA NOLOSHA IYO NABADGELYAYNTA QOFKA. ........................................................... 9
QODOBKA 19AAD: XAQA MADAXBANAANIDA QOFKA ........ 10
QODOBKA 20AAD: XURMADA HOYGA ............................ 10
QODOBKA 21AAD: XURIYADDA SAXAAFADDA ................... 11
QODOBKA 22AAD: XAQA XURIYADDA ISGAARSIINTA .......... 11
QODOBKA 23AAD: XURIYADDA KULAMADA IYO BANAANBAXYADA ................................................... 11
QODOBKA 24AAD: XUQUUQDA DARYEELKA QOYSKA ......... 12
QODOBKA 25AAD: XUQUUQDA HAWEENKA..................... 12
QODOBKA 26AAD: XUQUUQDA CARUURTA...................... 13
QODOBKA 27AAD: XUQUUQDA AGOONTA IYO DADKA BAAHIYAHA GAARKA AH QABA ...................................... 13
QODOBKA 28AAD: XUQUUQDA CAAFIMAADKA................. 14
QODOBKA 29AAD: XUQUUQDA WAXBARASHADA............. 14
QODOBKA 30AAD: XAQA DACWADA IYO ISDIFAACA .......... 16
QODOBKA 31AAD: XUQUUQDA EEDEYSANAHA ................. 16
QODOBKA 32AAD: XUQUUQDA QOFKA XUKUMAN ............ 18
QODOBKA 33AAD: MUWAADINIINTA KOONFURGALBEED .... 18
QODOBKA 34AAD: WAAJIBAADKA MUWAADINIINTA ......... 19
QODOBKA 35AAD: HESHIISYADA CAALAMIGA AH .............. 19
QODOBKA 36AAD: XADIDAADA XUQUUQAHA SIYAAASIGA IYO XURIYAADKA AASAASIGA........................................... 21
QODOBKA 37AAD: XAALADAHA DEG-DEGGA AH............... 21

**CUTUBKA 3AAD: QAAB-DHISMEEDKA DOWLADDA KOONFURGALBEED .......................................... 23**

QODOBKA 38AAD: QAAB DHISMEEDKA DOWLADDA KGS.... 23
QODOBKA 39AAD: GOLAHA XEER-DEJINTA (GOLAHA WAKIILADA)........................................................ 23
QODOBKA 40AAD: SHURUUDAHA KA MID NOQOSHADA GOLAHA WAKIILADA .............................................. 24
QODOBKA 41AAD: MUDDADA XIL-HEYNTA GOLAHA WAKIILADA........................................................ 25
QODOBKA 42AAD: AWOODDA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA WAKIILADA........................................................ 25
QODOBKA 43AAD: KALFADHIYADA GOLAHA WAKIILADA DOWLADDA KOONFURGALBEED.................................... 26
QODOBKA 44AAD: XIL-WAAYIDDA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA........................................................ 27
QODOBKA 45AAD: XASAANADDA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA IYO FULINTA ........................................... 27
QODOBKA 46AAD: GOLAHA FULINTA (XUKUUMADDA)....... 28
QODOBKA 47AAD: DOORASHADA MADAXWEYNAHA DOWLADDA KOONFURGALBEED.................................... 28
QODOBKA 48AAD: SHURUUDAHA MUSHARAXA MADAXWEYNAHA .................................................. 30
QODOBKA 49AAD: SHURUUDAHA MADAXWEYNE KU-XIGEENKA ........................................................................ 30

QODOBKA 50AAD: XILKA IYO AWOODAHA MADAXWEYNAHA ........ 31
QODOBKA 51AAD: XILKA IYO AWOODAHA MADAXWEYNE KU-XIGEENKA ........ 33
QODOBKA 52AAD: MUDDADA XIL-HEYNTA MADAXWEYNAHA IYO GOLAHA FULINTA ........ 33
QODOBKA 53AAD: XIL-WAAYIDDA MADAXWEYNAHA ........ 34
QODOBKA 54AAD: XIL-WAAYIDDA MADAXWEYNE KU-XIGEENKA ........ 35
QODOBKA 55AAD SHURUUDAHA XUBNAHA GOLAHA WASIIRADA (FULINTA) ........ 35
QODOBKA 56AAD: MAGACAABISTA GOLAHA FULINTA (WASIIRADA) ........ 36
QODOBKA 57AAD: XILKA IYO AWOODAHA GOLAHA FULINTA (WASIIRADA) ........ 36
QODOBKA 58AAD: XIL-WAAYIDDA GOLAHA WASIIRADA ........ 37
QODOBKA 59AAD: DHAARTA MADAXDA DOWLADDA KOONFURGALBEED. ........ 38

**CUTUBKA 4AAD: XAFIISYADA IYO GUDDIYADA MADAXA BANAAN EE DOWLADDA........ 39**

QODOBKA 60AAD: GUDDIYADA IYO XAFIISYADA MADAXA BANAN EE DOWLADDA KOONFURGALBEED........ 39
QODOBKA 61: BAAHINTA XAFIISYADA MADAXABANNAAN... 39

**CUTUBKA 5AAD: NIDAAMKA DOORASHOOYINKA IYO XISBIYADA SIYAASADEED ........ 40**

QODOBKA 62AAD: NIDAAMKA XISBIYADA SIYAASADEED ..... 40
QODOBKA 63AAD: TIRAKOOBKA MUWAADINIINTA DOWLADDA KOONFURGALBEED .................................................. 41
QODOBKA 64AAD: NIDAAMKA DOORASHOOYINKA DOWLADDA KOONFURGALBEED .................................................. 41

**CUTUBKA 6AAD: GARSOORKA DOWLADDA KOONFURGALBEED................................................ 42**

QODOBKA 65AAD: AWOODDA GARSOORKA .................... 42

**1. AWOODDA GARSOORKA DOWLADDA KOONFURGALBEED WAXAA U XIL-SAARAN MAXKAMADAHA. ............................................... 42**

QODOBKA 66AAD: MADAX-BANAANIDA GARSOORKA ........ 42
QODOBKA 67AAD: HABKA DACWAD-QAADISTA MAXKAMADAHA ..................................................... 43
QODOBKA 68AAD: QAAB-DHISMEEDKA MAXKAMADAHA .... 43
QODOBKA 69AAD: GUDDIGA ADEEGGA GARSOORKA ......... 44
QODOBKA 70AAD: MAXKAMADDA DASTUURKA................ 45
QODOBKA 71AAD: AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA SHAQO EE MAXKAMADDA DASTUURKA ........................................ 46
QODOBKA 72AAD: HABKA GO'AAN GAARISTA MAXKAMADDA DASTUURKA........................................................... 46
QODOBKA 73AAD: MAXKAMADDA SARE EE DOWLADDA KOONFURGALBEED .................................................. 47

QODOBKA 74AAD: MAGACAABIDDA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE ........ 48
QODOBKA 75AAD: SHURUUDAHA MAGACAABISTA GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE ........ 48
QODOBKA 76AAD: XIL KA QAADISTA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE ........ 49
QODOBKA 77AAD: MAGACAABISTA XEER ILAALINTA GUUD . 49
QODOBKA 78AAD: SHURUUDAHA MAGACAABISTA XEER ILAALIAYAHA GUUD ........ 49
QODOBKA 79AAD: XIL KA QAADISTA XEER ILAALIYAHA GUUD ........ 50
QODOBKA 80AAD: XARUNTA XEER ILAALINTA ........ 50

**CUTUBKA 7AAD: GOLAHA ODAYAASHA DHAQANKA 51**

QODOBKA 81AAD: GOLAHA ODAYAASHA DHAQANKA ........ 51
QODOBKA 82AAD: XILKA /WAAJIBAADKA GOLAHA ODAYAASHA DHAQANKA KGS ........ 51
QODOBKA 83AAD: HABMAAMUUSKA GOLAHA ODAYAASHA DHAQANKA DOWLADDA KGS ........ 52
QODOBKA 84AAD: XUQUUQDA GOLAHA ODAYAASHA DHAQANKA DOWLADDA KGS ........ 52

**CUTUBKA 8AAD: BAAHINTA MAAMULKA HEER GOBOL IYO DEGMO ........ 53**

QODOBKA 85AAD: BAAHINTA MAAMULKA GOBOLADA IYO DEGMOOYINKA ........ 53

QODOBKA 86AAD: MAGACAABISTA MAAMULKA GOBOLADA53
QODOBKA 87AAD: WAX-KABEDELKA QAAB-DHISMEEDKA GOBOLADA IYO DEGMOOYINKA DOWLADDA KGS.............. 53

**CUTUBKA 9AAD: SHAQAALAHA DOWLADDA .......... 55**

QODOBKA 88AAD: ILAALINTA SHAQAALAHA..................... 55
QODOBKA 89AAD: DARYEELKA SHAQAALAHA DOWLADDA .. 55
QODOBKA 90AAD: XEERARKA SHAQAALAHA .................... 56

**CUTUBKA 10AAD: DHULKA, HANTIDA, DHAQAALAHA IYO KHEYRAADKA DABIICIGA AH .............................. 57**

QODOBKA 91AAD: DHULKA........................................ 57
QODOBKA 92AAD: KALA GADASHADA HANTIDA UMADDA .. 58
QODOBKA 93AAD: LA WAREEGIDDA HANTIDA GAAR AHAANEED.......................................................... 58
QODOBKA 94AAD: HABKA DHAQAALAHA FURFURAN EE DOWLADDA KOONFURGALBEED.................................... 59
QODOBKA 95AAD: DARYEELKA DEEGAANKA IYO KHEYRAADKA DABIICIGA AH .................................................... 59

**CUTUBKA 11 AAD : CIIDAMADA DOWLADDA KOONFURGALBEED................................................. 61**

QODOBKA 96AAD: CIIDAMADA DOWLADDA KOONFURGALBEED ...................................................................... 61

**CUTUBKA 12AAD: XIRIIRKA DOWLADDA KOONFURGALBEED IYO DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA........................................................ 62**

QODOBKA 97AAD: WADASHAQEYNTA DOWLADDA KGS IYO DFS ................................................................ 62

QODOBKA 98AAD: XIRIIRKA DOWLADDA KGS IYO DOWLADAHA XUBNAHA KA AH DFS ................................ 63

**CUTUBKA 13AAD: WAX-KA-BEDELKA, KAABIDDA IYO ANSIXINTA DASTUURKA ........................................ 64**

QODOBKA 99AAD: WAX-KABEDDELKA IYO KAABIDDA DASTUURKA........................................................ 64

QODOBKA 100AAD: ANSIXINTA WAX-KA-BEDELKA IYO KAABIDDA DASTUURKA.............................................. 65

QODOBKA 101: ISWAAFAJINTA DASTUURKA DOWLADDA KGS IYO DASTUURKA KMG EE DFS .................................... 66

QODOBKA 102AAD: AFTIDA DASTUURKA ........................ 66

QODOBKA 103AAD: DHAQANGALKA DASTUURKA ............. 66

QODOBKA 104AAD: NUQULKA RASMIGA....................... 67

# ARAR

Waxaa aan ku bilaabeynaa, magaca ALLE (SWT) ee naxriista guud iyo midda gaar ahba naxariista.

Annaga oo ah ummadda degta gobolada kala ah Shabeellaha hoose, Baay iyo Bakool ee Soomaaliya;

- **Anaga oo og,** isla markaana ilaalinayna midnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed ee Muqadaska ah.
- **Maanka ku hayna** Dhibaatada, Xadgudubka, Xasuuqa iyo barakicinta ummadda deegaanadaan ay kasoo gaareen dagaaladii sokeeye ee dalka ka dhacay
- **Garwaaqsan** hannaanka Dowladeed ee Federaaliga ah ee ummadda Soomaaliyeed ay ku heshiisay.
- **Tixraaceyna** Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Soomaaliya qodobkiisa 49aad ee ka hadlaya dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka.

- Si aan u dhidibada ugu aasno dowlad xubin ka ah Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya, ka shaqeysa nabad, maamul-wanaag, cadaalad, sinnaan, iyo horumar, ugana soo kabano dhibaatooyinkii dagaalada sokeeye, waxaa aan ku heshiinay in Dastuurkaan KMG ah uu noqdo aasaaska iyo hagaha Dowladnimada Koonfiurgalbeed Soomaaliya.

# CUTUBKA 1AAD: MABAADI'DA GUUD

## Qodobka 1aad: Magaca Dowladda

Magaca Dowladdu waa Dowladda Koonfurgalbeed, waxa ayna xubin ka tahay Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya.

## Qodobka 2aad: Dhulka iyo Soohdimaha Dowladda Koonfurgalbeed

1. Dhulka Dowladda Koonfurgalbeed waxa uu ka kooban yahay gobolada kala ah:
   a. Shabeellaha -hoose,
   b. Baay iyo,
   c. Bakool.
2. Soohdimaha Dowladda Koonfurgalbeed waa xudduudihii gobollada iyo degmooyinka ee jiray 1991kii oo ay ku jiraan berriga, Badda, xeebaha, Jasiiradaha iyo Hawada sare
3. Dhulka iyo xuduudaha Dowladda Koonfurgalbeed waa laguma xad gudbaan, lamana kala qaybin karo.

## Qodobka 3aad: Diinta

1. Diinta Islaamka ayaa ah diinta deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed Soomaaliya.
2. Diin aan ahayn midda Islaamka laguma faafin karo deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed.

3. Xeer ama tallaabo maamul kasta oo aan waafaqsanayn shareecada Islaamka waa waxba Kama jiraan, burintiisana waxaa awood u leh maxkamadda Dastuurka.

## Qodobka 4aad: Mabaadi'da Aasaasiga ah

1. Dastuurka Dowladda Koonfurgalbeed waxaa saldhig u ah shareecada islaamka iyo Dastuurka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya.
2. Alle (SWT) ka sokoow, awoodda oo dhan waxaa iska leh Shacabka, waxa ayna u adeegsan karaan si toos ama si dadban oo ay ugu wakiilanayaan adeegayaal ay ku doorteen hab Dimoqoraadi ah si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale.
3. Wuxuu waajib ka dhigayaa Dastuurka dhaqan-gelinta hannaan dimuqraadi ah oo ku dhisan matalaadda dadweynaha, maamul wanaag, wadatashi, awood qeybsi iyo caddaalad bulsho loo dhan yahay.
4. Wuxu xaqiijinayaa kala madax-banaanida hey'adaha fulinta,Xeer-dejinta iyo garsoorka.
5. Wuxuu ku saleysanyahay nidaamka isla-xisaabtanka, hufnaanta iyo maamul loo wada dhan yahay.
6. Wuxuu waajib ka dhigayaa ilaalinta xuquuqda aadanaha, sarreynta iyo talinta sharciga, dhowrista xuquuqda dadka laga tirada badan

yahay iyo ku dhaqanka mabaadi'da guud ee Dastuurka JFS.

### Qodobka 5aad: Sarreynta Sharciga

1. Shareecada Islaamka ka sokow, Dastuurkan ayaa ah sharciga ugu sarreeya ee ay ku dhaqmeyso Dowladda Koonfurgalbeed.
2. Dhamaan hey'adaha Dowladda iyo masuuliyiinta waxa ay ku dhaqmayaan una hogaansamayaan Dastuurka Dowladda KGS.
3. Xeer ama tallaabo maamul kasta oo ka soo horjeedda Dastuurkan, waa waxba Kama jiraan; Maxkamadda dastuurka ayaa awood u leh burinta Xeerkaas ama tallaabadaasi.

### Qodobka 6aad: Afafka Rasmiga ah

1. Afafka rasmiga ah ee Dowladda Koonfurgalbeed waa Af-Soomaali (Maay iyo Maxaa), Carabiguna waa Afka labaad ee Dowladda.
2. Dowladda koonfurgalbeed waa inay daryeeshaa, ilaalisaa, isla markaasna horumarisaa Afka Soomaaliga (Maay iyo Maxa) iyo Suugaantiisa.

## Qodobka 7aad: Calanka iyo Astaanta Dowladda Koonfurgalbeed.

1. Calanka Dowladda KGS waa seddex qeyb; qeybta sare oo ah laydi buluug furan ah oo dhexda ku leh xidig cad oo shangeesood ah lehna madaxyo simman, qeybta dhexe waa gudduud xagal dadban ah, qeybta hoose waa cagaar dhexda ku leh lix xidig oo wareeg ah.
2. Astaanta Dowladda KGS waxay ka kooban tahay gaashaan dhexda kaga yaal calanka Dowladda oo leh xadiyad dahabi ah oo dheeh dahabi ah leh, gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo carbeed oo lix ah, mid walbana ay dhexda xiddig kaga taal, hareerahana waxaa ka haya laba haramacad oo isu tusmeeysan, kuna kala taagan laba waran oo is weeydaar ah, caaradda hoose ee gaashaanka, ayna wehliyaan laba caleen oo Moos ah iyo diilin buluug ah dhexda ay kaga qoran tahay magaca Dowladda Koonfurgalbeed.

## Qodobka 8aad: Magaalo madaxda Dowladda Koonfurgalbeed

1. Magaalo madaxda Dowladda Koonfurgalbeed waa Baraawe ee Gobolka Shabeellaha hoose.
2. Marko waa Magaalada ganacsiga ee Dowladda Koonfurgalbeed.
3. Baydhabo, Xudur iyo Marko waa Magaalo madaxyada gobolada Baay, Bakool iyo Sh/hoose.
4. Magaalo madaxda Baraawe wxaaa lagu dhaqayaa xeer gaar ah uu soo saari doono Golaha Wakiilada.

# CUTUBKA 2AAD: XUQUUQDA, XURIYAADKA AASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADINKA

## Qodobka 9aad: Karaamada Aadanaha

1. Karaamada aadanuhu waa deeq ALLE (SWT) ku manneystay qof kasto oo bani'aadam ah, xuquuqda aadanuhu deeqdaas ayeey ka dhalataa.
2. Karaamada Aadanaha waa laguma xadgudbaan, Dowladda KGS waajib ayaa ka saaran dhowristeeda.
3. Awoodda Dowladda waa in aan marnaba loo isticmalin meel ugu dhicidda karaamada aadanaha.
4. Dhaqan gelinta iyo ilaalinta dhamaan Axdiyada Caalamiga ah ee la xiriira dhowrista xuquuqda aadanaha ee aan ka hor imaaneynin shareecada Islaamka.

## Qodobka 10aad: Sinnaanta Bulshada

1. Dhamaan dadka ku nool deegaanada Dowladda KGS xuquuda iyo waajibaadka waa ay u siman yihiin sharciga hortiisa.
2. Qofna laguma takoori karo Midabkiisa, Diintiisa, Isirkiisa, heybtiisa, afguri, Jinsigiisa "Lab iyo dhedig", lixaadkiisa, xaalad bulsho ama dhaqaale iyo fikirka uu aamisan yahay.

3. Dastuurka wuxuu sugayaa xuquuqda naafada iyo dadka laga tirada badan yahay.

### Qodobka 11aad: Xuriyadda Caqiidada

1. Qofka Muslimka ahi Kama noqon karo Diinta Islaamka.
2. Qofka aan Muslimka aheyn xor ayuu u yahay ku dhaqanka diintiisa, haddii uusan dadka ku dhex faafineynin.

### Qodobka 12aad: Xuriyadda Fikirka

1. Qof kasta xur buu u yahay fikradiisa iyo soo bandhigeeda, hab xanaf iyo xadgudub la'aan ah.
2. Qofka wuxuu fikradiisa ku cabiri karaa qaab hadal, saxaafad, qoraal baahin, muuqaal, suugaan, Farshaxan iyo habab kale si waafaqsan Xeerarka iyo anshaxa.

### Qodobka 13aad: Xaqa Doorashada

1. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha Doorashada wuxuu xaq u leeyahay in uu wax doorto, Lana doorto.
2. Codayntu waa mid shaqsi ah, loo simanyahay, xor iyo qarsoodi ah.

## Qodobka 14aad: Xaqa Arji Qoroshada

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu cabasho qoran u diro Madaxweynaha, Golaha Wakiilada iyo Xukuumadda.
2. Cabasho kasta oo xeerka waafaqsan, Dowladdu waa in ay kaga jawaabtaa 60 (Lixdan) Cisho gudahooda.

## Qodobka15aad: Xaqa ka mid Noqoshada Ururada

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu aas-aaso, ka qayb-qaato ama kamid noqdo ururada siyaasadeed, dhaqameed, bulshadeed, cilmiyeed iyo dhaqaaleed.
2. Waxaa reeban jiritaanka Ururada leh ujeedooyin lid ku ah qawaaniinta Dowladda iyo Danaha Ummadda KGS.
3. Ururada leh shaqsiyadooda qaannuuneed, heshiisyada ayay xubnuhu ku galaan ururada, Waxa uu waajib ku wada noqonayaa dhammaan xubnaha ururka.

## Qodobka 16aad: Xuriyadda Dhaqdhaqaaqa

1. Muwaadin kasta ama qof kasta oo si xeerka waafaqsan deegaanada KGS ku jooga wuxuu u madax bannaan yahay inuu deegaanada ku maro ama ka dego meel kasta oo uu rabo, iyo

inuu deegaanka ka baxo, kuna soo laabto goortii uu doono si waafaqsan Xeerarka.

**2.** Meelaha iyo goobaha ay reeban tahay maridoodda iyo galidooda xeer gaar ah ayaa laga soo saarayaa.

## Qodobka 17aad: Xaqa Lahaanshaha Gaar ahaaneed

1. Muwaandin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu yeesho hanti u gaar ah.
2. Muwaadin kasta oo yeeshay hanti gaar ahaaneed waxaa ku waajibeysa canshuur si waafaqsan Xeerarka.
3. Dowladda waxa ay la wareegi kartaa hanti gaar loo leeyahay marka ay jirto dan guud, muwaadin kasta oo hantidiisa gaar ahaaned dan guud aawadeed loogala wareegay, wuxuu Dowladda xaq ugu yeelanaa magdhow u dhiganta oo lagu heshiiyay ama maxkamad go'aamisay.

## Qodobka 18aad: Xaqa Nolosha iyo Nabadgelyaynta Qofka

**1.** Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay Noloshiisa, waxaana keliya oo noloshiisa uu ku wayn Kara markii ay Maxkamad horteeda kaga caddaato dembi dil lagu mutaysan karo.

2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nabad–galyaynta jirkiisa iyo sharaftiisa.
3. Waxaa reeban dembiyada laga galo xuquuqda Aadamiga ah, sida: Xasuuqa, Kufsiga, Jirdilka, Afduubka, Addoonsiga iyo dil maxkamad la'aaneed.

## Qodobka 19aad: Xaqa Madaxbanaanida Qofka

1. Qofna xuriyadiisa lagama qaadi karo, lama baari karo, lamana xayiri karo haddii aanan Xeerka ogolaan.
2. Adoonsiga, Maddidin iyo ka ganacsiga dadku way reeban yihiin.

## Qodobka 20aad: Xurmada Hoyga

1. Hoyga iyo meelaha kale ee la degan yahay, waxay leeyihiin xur-mayntooda, ma banaana baarida, basaasidda iyo galida hoyga haddii aan amar garsoore oo sababaysan jirin ama Xeerku si kale u sheegin.
2. Mulkiilaha guriga iyo deganaha guriga waxa uu xaq u leeyahay in si toos ah loogu akhriyo amarka garsooraha, kahor inta aan hoyga la gelin.

## Qodobka 21aad: Xuriyadda Saxaafadda

1. Warbaahinta iyo saxaafadda waa xor, waa ay ka madax-bannaan yihiin fara-gelin; waxa ayna u howl-galayaan si waafaqsan xeerka.
2. Xeer gaar u ah saxaafadda ayay Golaha Wakiilada soo saari doonaan, oo faahfaahinaya nidaamkooda howleed.

## Qodobka 22aad: Xaqa Xuriyadda Isgaarsiinta

Qofna lama fara-gelin karo fariimihiisa/Qoraaladiisa gaarka ah, xiriirkiisa isgaarsiineed iyo Saxaafadeed, ma bannaana baaritaankooda, dabagalkooda ama dhagaysigoodi, haddii uusan Xeerku ogolaado ma ahanee; iyadoo ay markaasna waajib tahay in la helo amar Garsoore oo sababaysan.

## Qodobka 23aad: Xuriyadda Kulamada iyo Banaanbaxyada

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qeybgalo kulamo si nabdoon cabasho loogu muujinaayo; waase inay sii wargeliyaan Hay'adaha ay khusayso si badqabkooda iyo amnigooda loo ilaaliyo.
2. Haddii kulamada ama banaanbaxyada ay yihiin kuwa rabshado wata oo kasoo horjeeda Diinta Islaamka, anshaxa, amniga iyo

xasiloonida deeganaada Dowladda KGS, hey'adaha ay khuseyso ayaa joojin karta.

## Qodobka 24aad: Xuquuqda Daryeelka Qoyska

1. Qoyska waa aasaaska bulshada, waxa uu ka bilaabmayaa rag iyo dumar qaan-gaar ah oo isku guursaday si waafaqsan shareecada Islaamka.
2. Dowladda Koonfurgalbeed waxaa waajib ka saaran ilaalinta iyo dhowrista qoyska.
3. Waxaa reeban in la guursado hablaha aan qaan-gaarka aheyn.

## Qodobka 25aad: Xuquuqda Haweenka

1. Haweenku waxay leeyihiin xuquuq, xuriyad, waajibaadka dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed aan Diinta Islaamku ka reebin.
2. Si waafaqsan Diinta Islaamka, Dowladda KGS, waxaa waajib ka saaran xaqiijinta, dhowrista iyo horumarinta xuquuqda haweenka.
3. Haween weynaha Dowladda KGS, waxa ay xaq u leeyihiin in ay kamid noqdaan seddexda laamood ee Dowladda si wax ku ool ah iyo dhamaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo.

## Qodobka 26aad: Xuquuqda Caruurta

1. Ereyga "Caruur" waxaa loo adeegsanayaa muwaadin kasta oo da'diisu ay ka yar tahay Sideed iyo toban (18) sanno.
2. Ilma kasta waxa uu xaq u leeyahay nolol, magac, jinsiyad, korin iyo daryeel.
3. Waxaa reeban shaqaaleynta caruurta ee wax u dhimaysa noloshooda, dhaqankooda, Koriimadooda iyo Waxbarashadooda.
4. Dastuurka Dowladda KGS, waxa uu reebayaa askareynta caruurta iyo in loo adeegsado dagaalada hubeysan.

## Qodobka 27aad: Xuquuqda Agoonta iyo Dadka baahiyaha gaarka ah qaba

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxaa waajib ka saaranyahay daryeelka iyo ka warqabka muwaadin kasta aan is daryeeli Karin, cid daryeesha aanan heysan.
2. Dowladda KGS waxa ay dhiirigelineysaa, dhisaysaa hey'ado iyo goobo lagu daryeelo dadka qodobkaan ku xusan.
3. Golaha Wakiilada ayaa xeer-gaar ah kasoo saari doona arrimaha la xiriira dadka ku xusan faqradda 1aad.

## Qodobka 28aad: Xuquuqda Caafimaadka

1. Dowladda ayaa u xilsaaran Caafimaadka guud, gaar ahaan kan Hooyada iyo dhallaanka, ka hortaga cudurrada faafa, Nadaafad darida & wasaqeynta Bay'ada.
2. Dowlada ayaa xil ka saaran yahay horumarinta iyo baahinta adeegyada Caafimaadka.
3. Dowlada KGS, waxaa waajib ka saaran ka hortagga iyo daaweynta cudurada faafa.
4. Dowladda waa ay ogoshahay furashada rugo iyo xarumo caafimaad iyo Cusbitaalo gaar loo leeyahay.
5. Xeer gaar ayuu Golaha Wakiilada kasoo saari doonaa oo nidaaminaya xarumaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay.
6. Xukuumadda waxaa waajib ka saaran lasocodka iyo kormeeridda tayada adeegyadaasi caafimaad.

## Qodobka 29aad: Xuquuqda Waxbarashada

1. Horumarinta, Baahinta iyo Faafinta cilmiga iyo waxbarashada waa waajib ummadeed, meel marintoodana, Dowladda KGS ayaa u xilsaaran
2. Dowladda xil dheeraad ah ayaa ka saaran la dagaalanka akhris-qoraal la'aanta Afka hooyo (Maay iyo Maxaa).
3. Waxbarashada aasaasiga ah waxaa loo aqoonsanyahay;

a. Dugsiyada quraanka
b. Xannaanada caruurta
c. Dugsiyada hoose, Dhexe iyo Sare
d. Waxbarashada Dadka waaweyn, xirfadaha iyo macaahidda barashada shareecada Islaamka.

4. Dowladda KGS, waxaa waajib ka saaran yahay horumarinta iyo ka warqabka madaarista barashada shareecada iyo dugsiyada quraanka.
5. Waxbarashada asaasiga waa qasab
6. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho tayo leh oo bilaash ah.
7. Waxaa jiraya Manhaj Midaysan oo u degsan guud ahaan Dalka.
8. Qofka qaan gaarka ahi, wuu u madax bannaan yahay Doorashadiisa waxbarasho iyo tan Xirfadeed.
9. Waxaa la furan karaa Dugsiyo Waxbarasho, Dugsiyo Xirfadeed iyo Jaamacado gaar ah, si waafaqsana xeerarka waxbarasha.
10. Dowladda KGS, waxaa waajib ka saaran ilaalinta tayada waxbarashada.
11. Dowladda xil ayaa ka saraan Aqoonta & hirgelinta Jaamacad Dowladda ay leedahay.
12. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya dugsiyada, jaamacadaha iyo xaruumaha Waxbarashada gaarka ah

## Qodobka 30aad: Xaqa Dacwada iyo Isdifaaca

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad qaanuunka waafaqsan ka furto Maxkamadaha awooda u leh.
2. Qofkastaa waxuu xaq uleeyahay in uu helo garsoor madax-banaan, caadil ah, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo waqti macquul ah, ama golihii kale ee awood go'aan gaaris ah u leh;
    a. Arin kasto oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka madaniga ah, ama;
    b. Faldanbiyeed kasta oo kale lagu soo oogay, ciqaabna lagu muteysanayo.
3. Qofna looma qaban karo, xiri karo fal markii uu galaayay aan dembi ku ahayn qaanuunka.
4. Ciqaab aan Maxkamad ka soo bixin cidna laguma fulin karo.
5. Dembi iyo ciqaab aan Xeeka waafaqsanayn ma jiri karo, mas'uuliyada faldembiyeedkuna waa shaqsi.
6. Qofkasta waxa uu xaq u leeyahay in uu iska difaaco dacwadda lagu soo oogay, heer iyo derajo kasto ay taagan tahay.

## Qodobka 31aad: Xuquuqda Eedeysanaha

1. Eedeysanaha waxaa loo aqoonsanaa tuhunsane, ilaa maxkamad si kamadambeys ah dambiga ugu xukunto.

2. Eedaysanaha laguma hayn karo meel aan qaanuunka banaynin, waana in 48 Saac gudaheeda la horgeeyaa maxkamadda awooda u leh.
3. Eedaysanaha waa in Maxkamadda awoodda u leh si tafaftiran ugu akhriso dembiga lagu soo oogay.
4. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan eheladiisa, Qareenkiisa, dhakhtarkiisa iyo asxaabtiisa, wuxuu kaloo xaq u leeyahay iyo in la damiinto, haddii uu Xeerka ogol yahay.
5. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu Qareen difaaca qabsado, haddii uusan awoodi Karin, Dowladu waa in ay u qabataa qareen ku difaaca si bilaash ah.
6. Eedaysanuhu laguma qasbi karo qirashada dembiga loo haysto.
7. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu isku difaaco Maxkamadda horteeda.
8. Qofka xuriyadiisa shaksiga ah laga qaado, wuxuu xaq u leeyahay in lagu ogeysiiyo dambiga lagu tuhunsan yahay.
9. Qofkasta oo xuriyadiisa shakshiga ah laga qaado, waa in xaaladiisa la gaarsiiya ehelkiisa iyo qoyskiisa.

## Qodobka 32aad: Xuquuqda Qofka Xukuman

1. Qofka ay Maxkamad xukuntay oo xiran wuxuu xaq u leeyahay in la dhowro nabadgelyadiisa, sharaftiisa iyo karaamadiisa Bini'aadannimo.
2. Qofka xukuman waxa uu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan eheladiisa, Qareenkiisa, asxaabtiisa iyo dhaqtarkiisa.
3. Xukumanaha Xabsiga ku jira wuxuu xaq u leeyahay daryeel Caafimaad, cunno iyo waxbarasho.
4. Xukumanaha Xabsiga ku jira wuxuu xaq u leeyahay xuquuqda Caalamiga ah ee maxaabiista.
5. Xukumanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato xukunka Maxkamadu ku riday, isaga oo rafcaanku ku caddaynaya Maxkamadii xukuntay mid ka saraysa.

## Qodobka 33aad: Muwaadiniinta Koonfurgalbeed

1. Qof kasta oo u dhashay deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed ayaa loo aqoonsanayaa muwaadin.
2. Muwaadinnimada Dowladda KGS waxaa soo cadeynaya Dowladda hoose ee degmada uu qofku u dhashay.

## Qodobka 34aad: Waajibaadka Muwaadiniinta

1. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah adkaynta midnimada Ummadda iyo Ilaalinta Dowladnimada.
2. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah dhowrista Diinta Islaamka, Dastuurka, Xeerarka kale ee u degsan Dowladda KGS.
3. Muwaadin walba waxaa ku waajib ah bixinta canshuuraha ku waajibay.
4. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah ka qeyb-galka difaaca Dowladda Koonfurgalbeed.
5. Muwaadinka waa in uu ka qeyb-qaataa codeynta waqtiyada Doorashooyinka, haddii uu shuruudaha Doorashada buuxiyo.
6. Muwaadinka waa in uu ka shaqeeyaa midnimada bulshada iyo jiritaanka Dowladda KGS.
7. Muwaadinka waa in uu ka qeyb-qaataa amniga iyo xasiloonida guud ee deegaanada Dowladda KGS.
8. Xeer gaar ah ayaa qeexaya ciqaabta ka dhalaneysa gudasho la'aanta waajibaadka ku xusan qodobkaan.

## Qodobka 35aad: Heshiisyada Caalamiga ah

1. Dowladda KGS waxay ilaalineysaa:

a. Dhamaan heshiisyada Caalamiga ah ee aan ka hor imaaneynin Diinta Islaamka, danaha iyo maslaxada Dowladda Koonfurgalbeed.
b. Dowladda KGS waxay aqoonsan tahay kuna dhaqmaysaa Axdiyada Caalamiga ah ee ay Qaramada Midoobay iyo Qawaaniinta Caalamiga ah ee Dowlada Federaalka ay qeyb ka tahay.

2. Waxay xurmaynaysaa baaqyada Caalamiga ah ee dhowrista Xuquuqda Aadanaha iyo wixii kale ee aan ka hor imaaneynin Shareecada Islaamka iyo Qawaaniinta Dowladda KGS iyo Jamhuuriyada Federaalka.
3. Waxay xushmaynaysaa, Axdiga Midnimada Afrika (African Union Charter), Jaamacada Carabta, (Arab League) Urur Goboleedka Horumarinta Geeska Afrika (IGAD) iyo Ururka Iskaashiga Islaamka (OIC).
4. Dowladda Koonfurgalbeed Soomaaliya waxay Taageeraysaa in khilaafaadka aasaasiga ah ee abuurma ama horeyba u jiray lagu dhameeyo wada hadal iyo hab nabadeed.
5. Dowladda KGS waxay ka soo horjeedaa fekirka xagjirka, Argagaxisanimada iyo wixii la xiriira.
6. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay ayideysaa mabda' aayo-katashiga ee bulshada caalamka.

## Qodobka 36aad: Xadidaada Xuquuqaha Siyaaasiga iyo Xuriyaadka Aasaasiga

1. Xuquuqda iyo xuriyaadka lagu sheegay cutubkaan waxaa xaddidi Kara Xeerkan.
2. Dhammaan xuquuqaha iyo xuriyaadka qofka waxaa shardi u ah inaysan ka hor–imaanin shareecda Islaamka, dastuurka, xeerarka, anshaxa guud, xasiloonida ama xuquuqda qof kale.
3. Dastuurka ayaa qof kasta u damaanad qaadaya xuquuqdiisa iyo xuriyadiisa.

## Qodobka 37aad: Xaaladaha Deg-degga ah

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay awood u leedahay in ay xaalad degdeg ah geliso dhamaan gobolada ay ka kooban tahay ama qeyb ka mid ah si looga hortago, waxna looga qabto arrimaha hoos ku xusan:
    a. Musiibooyinka dabiiciga ah,
    b. Cudurada halista ah ee faafa,
    c. Dagaalo iyo weeraro argagixiso,
    d. Fallaaganimo iyo gadood,
    e. Xasilooni-darro soo wajahda Dowladda KGS.
2. Inta lagu gudo jiro xaaladda deg-degga ah, xuriyaadka iyo xuquuqaha ku xusan qodobada 12aad, 16aad, 21aad, 22aad, 23aad iyo 24aad

ee cutubkaan; Dowladdu si ku meelgaar ah ayey u laali kartaa.

**3.** Xaaladda degdega ah waa in aysan ka badnaan muddo Soddon (30) cisho.

**4.** Soddon cisho kadib, haddii xaaladihii ay sii jiraan, Golaha Wakiilada ayaa awood u leh kordhinta muddadaasi.

# CUTUBKA 3AAD: QAAB-DHISMEEDKA DOWLADDA KOONFURGALBEED

## Qodobka 38aad: Qaab dhismeedka Dowladda KGS

1. Qaab dhismeedka Dowladda KGS waxuu ka kooban yahay saddex heer oo kala ah:
   a. Golaha Xeer dejinta (Golaha Wakiilada),
   b. Golaha Fullinta (Golaha Wasiirada)
      i. Maamulada gobolada.
      ii. Dowladaha hoose
   c. Golaha Garsoorka.
2. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay ku dhisan tahay nidaamka Dowladeedka ee Baarlamaaniga ah.
3. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay adkeyneysaa kala soocnaanta awoodaha laamaha Dowladda.

## Qodobka 39aad: Golaha Xeer-dejinta (Golaha Wakiilada)

1. Golaha Wakiilada Dowladda KGS, waa hey'adda ugu sareysa ee awoodda u leh xeer-dejinta.
2. Tirada guud xubnaha Golaha Wakiilada waa 95 Xubnood, oo 20% ay Haween yihiin.

3. Inta laga hirgelinayo nidaamka doorashooyinka tooska ah ee hal qof iyo hal cod; Xubnaha Xildhibaannada Golaha Wakiilada waxaa soo xulaya odayaasha dhaqanka beelaha lagu matalo kuraasta.
4. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa magacaabaya guddi doorasho oo u xil saaran xulista xubnaha Golaha Wakiilada.
5. Tirada xubnaha Guddiga waxa ay ka koobnaan doonaan 9 xubnood.

## Qodobka 40aad: Shuruudaha Ka mid Noqoshada Golaha Wakiilada

1. Xubnaha ka mid noqonaya Golaha Wakiilada waa in ay soo buuxiyaan shuruudahan soo socda:
    a. In uu Muslim yahay kuna dhaqmaa Diinta Islaamka.
    b. In uu Soomaali yahay una dhashay deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed.
    c. Inaysan da'diisu ka yareyn 25 sano
    d. In uu dhimirkiisu fayow yahay.
    e. In uusan qabin xanuun ka hor istaagi Kara gudashada waajibaadkiisa Shaqo.
    f. In uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta.
    g. Inaysan maxkamad horey ugu ridin xukun ciqaabeed kamadambeys ah.

## Qodobka 41aad: Muddada Xil-heynta Golaha Wakiilada

1. Muddo xileedka Golaha wakiiladu waa Shan (5) sanno oo ka bilaabanaysaa maalinta xilka loo dhaariyo.
2. Golaha Wakiilada lama kala diri karo mudada Shanta (5) sanno ah gudaheeda.

## Qodobka 42aad: Awoodda iyo Waajibaadka Golaha Wakiilada

1. Golaha Wakiilada waxay awood u leeyihiin: -
   - **a.** Doorashada Guddoomiyaha Golaha Wakiilada iyo ku xigeenadiisa 1aad iyo 2aad.
   - **b.** Doorashada Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed
   - **c.** Diyaarinta iyo ansixinta Xeer – hoosaadka Golaha Wakiilada.
   - **d.** Kalsooni siinta, u diididda ama kala noqoshada Golaha Wasiirada Dowladda KGS.
   - **e.** Kalsooni siinta Madaxweyne ku-xigeenka.
   - **f.** Ogolaanshaha, wax-ka-beddelka ama diididda miisaaniyadda Dowladda.
   - **g.** Ansixinta, wax-ka-beddelka ama diididda shuruucda ay u soo gudbinayaan Golaha Wasiirada.

h. Ka doodidda iyo u codeynta mooshin ay soo curiyeen Golaha Wakiilada dhexdooda ama mooshin ay soo jeediyeen ugu yaraan toban Kun (10,000) oo qof oo ka mid ah shacabka Dowladda.
i. Ogolaanshaha ama diidmada kordhinta xaaladda degdeg ah oo xukuumadda ku soo rogtay deegaanada Koonfurgalbeed 10 cisho gudahooda.
j. Ansixinta ama diidadda heshiisyada xukuumadda ay gasho

2. Ansixinta iyo kalsooni siinta guddiyada madaxa-Banaan ay xukuumadda soo jeediso.

## Qodobka 43aad: Kalfadhiyada Golaha Wakiilada Dowladda Koonfurgalbeed

1. Golaha Wakiilada wuxuu yeelanayaa kalfadhiyadisa caadiga ah laba jeer sanadkiiba, kalfadhi kastaaba wuxuu soconayaa muddo 4 bilood ah.
2. Kalfadhiyada aan caadiga aheyn waxaa iskugu yeeri kara Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, codsi ka yimaada Madaxweynaha ama ¼ xubnaha Golaha Wakiilada ayaga oo dhamaan codsi qoraal ah ku soo dalbanaya.
3. Golaha fulinta Dowladda waxaa loogu yeeri karaa ka qeyb-galka kalfadhiyada Golaha

Wakiilada, si ay uga jawaabaan ama cadeymo uga bixiyaan su'aalo xilkooda khuseeya.

4. Kulamada Golaha Wakiilada uu yeelanaayo waxa ay ku guntamayaan (50+1) tirada guud ee Golaha.

### Qodobka 44aad: Xil-waayidda Xubnaha Golaha Wakiilada

1. Xubnaha Golaha Wakiilada waxay xilkooda ku waayi karaan:
    - **a.** Geeri ku timaada xubinta.
    - **b.** Istiqaalo qoraal ah uu usoo gudbiyay guddoonka Golaha Wakiilada.
    - **c.** Xil gudasho la'aan joogto ah
    - **d.** Xukun ciqaabeed Kama dambeys ah oo ay maxkamad ku riddo.
    - **e.** Xubinta oo aqbasho xil aan Wasiir aheyn.

### Qodobka 45aad: Xasaanadda Xubnaha Golaha Wakiilada iyo Fulinta

1. Golaha Wakiilada iyo Fulinta ee Dowladda waxay leeyihiin xasaanad buuxda:
    - **a.** Lama Qaban karo, lamana xiri karo, hadii aan lagu qabanin isaga oo fal danbiyeed faraha kula jira.
    - **b.** Lama baari karo korkiisa, hoygiisa, gaarigiisa, iyo shakhsiyaddiisa.

c. Dacwad ciqaab la xiriirta laguma soo oogi karo.
d. Haddii xubinta Baarlamanka ay dembi gasho, Xeer ilaaliyaha Guud wuxuu Golaha Wakiilada soo weydiisanayaa in xasaanadda laga qaado si loo soo eedeeyo.

## Qodobka 46aad: Golaha Fulinta (Xukuumadda)

1. Hay'adda Fulinta ee Dowladda Koonfurgalbeed waxay ka kooban tahay: -
   a. Madaxweyne
   b. Madaxweyne ku-xigeen.
   c. Wasiir
   d. Wasiiru-dowle
   e. Wasiir ku-xigeen

## Qodobka 47aad: Doorashada Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed

1. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed waxaa dooranaya Xildhibaanada Golaha Wakiilada iyada oo la raacayo habraaca hoos ku xusan:
   **a.** Codeynta Doorashada Madaxweynaha waa mid shakshi ah oo qarsoodi ah.
   **b.** Ugu yaraan seddex meelood labo (2/3) tirada guud ee Golaha Wakiilada Dowladda KGS

waa in ay joogaan u codeynta doorashada Madaxweynaha.

**c.**Golaha Wakiilada waxa ay u dooranayaan musharixii ku guleeysta wareega koowaad codad dhan (2/3) tirada guud ee Golaha Wakiilada.

**d.**Haddii la waayo musharax hela intaas tirada (2/3) ee wareega 1aad, waxaa wareega 2aad ee codeynta u gudbaya seddexda (3) musharax ee ugu codadka badan wareega 1aad; waxaana guuleysanayaa musharixii hela wareega 2aad codad dhan (2/3) tirada guud ee Golaha Wakiilada.

**e.**Haddii la waayo musharax hela codad dhan (2/3) ee wareega labbaad; labada musharax ee ugu codadka badan ayaa u gudbaya wareegga 3aad; musharixii hela wareega 3aad ee cod bixinta aqlabiyad hal dheeri ah (50+1) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiilada ayaa noqonaya Madaxweynaha la doortay ee Dowladda Koonfurgalbeed.

**2.** Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ee la doortay ayaa magacaabaya Madaxweyne ku-xigeenka

**3.** Madaxweyne ku-xigeenka la magacaabay waxaa cod hal dheeri (50+1) ku ansixinaya Golaha Wakiilada Dowladda Koonfurgalbeed.

## Qodobka 48aad: Shuruudaha Musharaxa Madaxweynaha

1. Waxaa loo dooran karaa xilka Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed:
   - **a.** Muwaadin soomaali ah, u dhashay degaanada KGS, uuna qabin xaas ajnabi ah.
   - **b.** In uu yahay Muslim kuna dhaqma diinta Islaamka.
   - **c.** Da'diisu aanan ka yareyn 40 sano.
   - **d.** Leh aqoon jaamacadeed ama waayo-aragnimo u dhiganta.
   - **e.** Dhimirkiisa fiyoowyahay.
   - **f.** Gelin denbi ciqaabeed oo ay maxkamadi xukuntay.

## Qodobka 49aad: Shuruudaha Madaxweyne ku-xigeenka

1. Madaxweyne ku-xigeenka Dowladda Koonfurgalbeed waxaa loo magacaabayaa qofka buuxiya shuruudaha hoos ku xusan;
   - **a)** Muwaadin soomaali ah, u dhashay degaanada KGS.
   - **b)** In uusan qabin xaas ajnabi ah.
   - **c)** In uu Muslim yahay kuna dhaqmo diinta islaamka.
   - **d)** Da'diisu aaney ka yareyn 40 sano.

e) Leh aqoon jaamacadeed ama waaya aragnimo u qalanta xilkaas.
f) Dhimirkiisu fiyoowyahay.
g) Gelin denbi ciqaabeed oo ay maxkamadi xukuntay.

## Qodobka 50aad: Xilka iyo Awoodaha Madaxweynaha

1. Madaxweynaha waa astaanta midnimada Shacabka Koonfurgalbeed.
2. Madaxweynaha waa ilaaliyaha iyo horumariyaha ku dhaqanka shareecada Islaamka, Sarreynta Dastuurka iyo xeerarka kale ee Dowladda.
3. Madaxweynaha waa madaxa Dowladda iyo gudoomiyaha Golaha fulinta.
4. Madaxweynaha waxaa uu leeyahay awoodda magacaabidda iyo xil ka qaadista Madaxweyne ku-xigeenka.
5. Madaxweynaha wuxuu leeyahay awoodda magacaabidda iyo xil kaqaadista xubnaha Golaha fulinta.
6. Madaxweynaha waa taliyaha guud ee ciidamada Dowladda Koonfurgalbeed.
7. Wuxuu leeyahay awoodda saamaxaadda iyo cafiska marka uu helo talo ay soo jeediyaan hay'addaha garsoorka.

8. Madaxweynahu wuxuu leeyahay awooda hadal jeedinta furitaanka kalfadhiyada Golaha Wakiilada.
9. Madaxweynaha wuxuu muddo 30 cisho gudahooda ku saxiixayaa xeerarka Golaha Wakiilada soo ansixiyaan.
10. Madaxweynaha wuxuu awood u leeyhay dib u celinta xeerarka Golaha Wakiilada soo ansixiyaan, waana in uu sababeyn cad raaciyaa dib u celinta xeerkaas.
11. Kadib soo jeedinta Golaha Wasiirada, Madaxweynuhu waxa uu soo rogayaa xaalad degdeg ah si looga hortago musiibooyinka dabiiciga ah, Gadoodka, Falaagonimada iyo daggaalada.
12. Madaxweynuhu wuxuu magacaabayaa saraakiisha sarsare ee Garsoorka iyo kuwa xafiisyada madaxabanaan ee Dowladda.
13. Madaxweynaha waxa uu ka qeybgalayaa shirarka iyo wada-hadalada u dhexeeya madaxda Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka oo looga hadlayo geediga Dowlad dhiska Soomaaliya, dhameystirka Dastuurka KMG ah iyo go'aaminta arrimaha masiiriga ah ee dalka.
14. Madaxweynaha wuxuu leeyahay awoodda magacaabidda iyo dalacsiinta hogaanka sare iyo sarakiisha ee Ciidamada Dowladda KGS.

15. Madaxweynaha wuxuu magacaabaya Guddoonadda maamulada Gobolada Dowladda Koonfurgalbeed
16. Madaxweynaha waxa uu saxiixayaa heshiisyada u dhexeeya Dowladda Koonfurgalbeed, Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo hey'daha maalgashadayaasha caalamiga.
17. Madaxweynaha waxa uu leeyahay bixinta bilad-sharafeedka ugu sareeysa ee Koonfurgalbeed.

## Qodobka 51aad: Xilka iyo Awoodaha Madaxweyne ku-xigeenka

1. Madaxweyne ku-xigeenka Dowladda KGS waxa uu qabanayaa xilka ku-simaha Madaxweynaha, marka uu Madaxweynaha ka maqan yahay dhulka deegaanada Dowladda KGS.
2. Madaxweyne ku-xigeenka waxa uu qabanayaa howlaha uu u xil-saarto Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed.

## Qodobka 52aad: Muddada Xil-heynta Madaxweynaha iyo Golaha Fulinta

1. Muddada xilka Madaxweynaha Dowladda KGS iyo Golahiisa Fulinta waa Shan (5) sanno oo laga

tirinaayo maalinka Madaxweynaha xilka loo dhaariyo.

2. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed waxaa la dooran karaa laba xili doorasho oo isku xiga kaliya.
3. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed Kama maqnaan karo Deegaanada Koonfurgalbeed wax ka badan 45 maalmood, haddii aysan jirin xaalad qasbaysa.

### Qodobka 53aad: Xil-waayidda Madaxweynaha

1. Madaxweynaha waxa uu xilkiisa ku waayi karaa qodobada soo socda:
    - **a.** Geeri ku timaada Madaxweynaha
    - **b.** Istiqaalo qoraal ah uu usoo gudbiyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada
    - **c.** Haddii uu ku xadgudbo Dastuurka iyo shuruucda kale ee Dowladda KGS.
    - **d.** Mooshin eedeyn (Impeachment) oo ay soo jeediyeen (1/3) xubnaha Golaha Wakiilada, sharciyadda mooshinkaasi ay xaqiijiso maxkamadda Dastuuriga ah, kadibna ayna u codeeyaan (2/3) tirada guud ee Golaha Wakiilada.
    - **e.** Haddii Madaxweynuhu waayo xilkiisa, waxaa si ku-sime ah xilka u haynaya ku-xigeenkiisa.

f. Haddii Madaxweynaha xilkiisa waayo, waa in 30 maalmood gudahooda lagu doortaa Madaxweyne cusub.

## Qodobka 54aad: Xil-waayidda Madaxweyne ku-xigeenka

1. Madaxweyne ku-xigeenka waxa uu xilkiisa ku waayi karaa arrimaha hoos ku xusan:
   a. Geeri
   b. Istiqaalo qoraal ah oo u gudbiyo Madaxweynaha
   c. Xil gudasho la'aan
   d. Ku xad gudubka Dastuurka iyo shuruucda kale ee uu degsan Dowladda Koonfurgalbeed.
   e. Haddii Maxkamad dambi Kama dambeys ah ay ku xukunto.
2. Madaxweyne ku-xigeenka waxaa xilka ka qaadaya madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed haddii ay dhacaan arrimaha ku xusan xarfaha (c, d & e) ee faqradda 1aad ee qodobkan.

## Qodobka 55aad Shuruudaha Xubnaha Golaha Wasiirada (Fulinta)

1. Xubnaha loo magacaabayo Golaha Wasiirada waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda;

a. In uu yahay muwaadin u dhashay Dowladda Koonfurgalbeed
b. In da'diisu aanay ka yareyn 30 sanno.
c. Waa in uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ama waayo aragnimo u dhiganta.
d. In xukun ciqaabeed kamadambeys ah aysan maxkamad ku ridin.

## Qodobka 56aad: Magacaabista Golaha Fulinta (Wasiirada)

1. Xubnaha Golaha Wasiirada waxaa magacaabaya Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed muddo 30 maalmood gudahooda ah, kadib marka xilka loo dhaariyo.
2. Golaha Wasiirada la magacaabay waxaa codka kalsooni siin doono Golaha Wakiilada.
3. Golaha Wasiirada waxaa laga soo xulayaa xubnaha Golaha Wakiilada ama xubno aanan ka tirsaneyn Golaha Wakiilada.

## Qodobka 57aad: Xilka iyo awoodaha Golaha Fulinta (Wasiirada)

1. Golaha Wasiirada waxaa shir gudoominaya Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed.
2. Madaxweynaha isaga oo ku sugan deegaanada Dowladda KGS ayuu shir guddoonka u xilsaaran karaa ku-xigeenkiisa.

3. Haddii Madaxweynaha Dowladda KGS uu ka maqan yahay deegaanada Dowladda, waxaa ku sime noqonaya ku-xigeenkiisa.
4. Golaha Wasiirada waxa ay leeyihiin awoodda ugu sareysa ee fulinta Dowladda Koonfurgalbeed.
5. Golaha Wasiirada waxay mas'uul ka yihiin jaan-goynta siyaasadda, maareynta iyo socod siinta howl maalmeedka Dowladda.
6. Go'aanada Golaha Wasiirada waa cod hal dheeri ah (50%+1).

## Qodobka 58aad: Xil-waayidda Golaha Wasiirada

1. Wasiirada waxa ay xilkooda ku weyn karaan:
    - **a.** Geeri
    - **b.** Istiqaalo qoraal ah ama mid af ah oo uu Madaxweynaha u gudbiyo.
    - **c.** Xil gudasho la'aan joogto ah.
    - **d.** Haddii uu haleelo Xanuun ka hor istaagaya gudashada waajibaadkiisa shaqo.
    - **e.** Hadii dhamaan Golaha Wasiirada ay lumiyaan codka kalsoonida Golaha Wakiilada, Madaxweynaha wuxuu muddo 30 Cisho gudahood ku soo magacaabayaa Gole Wasiiro cusub.

## Qodobka 59aad: Dhaarta Madaxda Dowladda Koonfurgalbeed

1. Mas'uul kasta oo xil u qabanayo Dowladda Koonfurgalbeed wuxuu marayaa dhaarta hoos ku xusan:
   ***"Bismillaahi Raxmaani Raxiim, waxaa igu Wallaahi ah, igu Billaahi ah, igu Tallaahi ah, oo aan magaca Ilaahey ugu dhaaranayaa, inaan u guto xilkeyga si daacad ah, oo ay danta dadka, dalka iyo diintuba ku jirto, dhowrayana Dastuurka iyo Shurucda kale ee Dowladda Koonfur Galbeed u degsan".***
2. Mas'uulkasta wuxuu dhaartan marayaa ka hor inta uusan xilka la wareegin, isaga gacanta midig saaraya kutubka qur'aanka kariimka ah.
3. Guddoomiyaha ama Garsoore ka tirsan Maxkamadda sare ee Dowladda KGS ayaa dhaarinaya mas'uul kasta oo xil u qabanayo Dowladda.

# CUTUBKA 4AAD: XAFIISYADA IYO GUDDIYADA MADAXA BANAAN EE DOWLADDA

## Qodobka 60aad: Guddiyada iyo Xafiisyada Madaxa - banaan ee Dowladda Koonfurgalbeed

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay yeelanaysaa Xafiisyada/hey'daha madaxa bannaan ee hoos ku xusan:
    - **a.** Garyaqaanka Guud
    - **b.** Hantidhowraha Guud
    - **c.** Xisaabiyaha Guud
    - **d.** Guddiga doorashooyinka/xuduudaha
    - **e.** Guddiga Xuquuqul Insaanka
    - **f.** Guddiga ladagaalanka Musuqmaasuqa
    - **g.** Gudiga adeega garsoorka
2. Xeerar gaar ah uu soo saaro Golaha Wakiilada ayaa lagu qeexi doonaa waajibaadka shaqo ee Xafiisyada iyo hey'daha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkaan.

## Qodobka 61: Baahinta Xafiisyada Madaxabannaan

Xafiisyada Madaxa bannaan ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobka 60 aad, waxay mas'uuliyaddooda ku baahinayaan dhamaan deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed.

# CUTUBKA 5AAD: NIDAAMKA DOORASHOOYINKA IYO XISBIYADA SIYAASADEED

## Qodobka 62aad: Nidaamka Xisbiyada Siyaasadeed

1. Dowladda Koonfur Galbeed waxa ay ku dhaqmaysaa nidaamka Xisbiyada badan.
2. Golaha Wakiilada ayaa soo saari doona xeer gaar ah, oo lagu nidaaminayo qaab dhismeedka iyo diiwaangelinta xisbiyada siyaasadeed.
3. Waxaa reeban xisbi kasta ee siyaasadeed oo u abaabulan hab qabyaaladeeysan, qarsoodi ah, hubeysan ama xagjir ah.
4. U tartamidda doorashooyinka waxa ay u furantahay urur kasta oo buuxiya halbeegyada iyo shuruudaha looga baahanyahay ee ku xusan xeerka doorashooyinka.
5. Seddexda (3) ururo siyaaseed ee ka hela codadka ugu badan ee doorashooyinka 1aad ee golayaasha deegaanka ayaa noqonaya Seddexda (3) xisbi siyaasadeed ee Dowladda KGS.
6. Laba Xilli doorasho kasta kadib waxaa furmaya tartanka Ururada siyaasadeed.

## Qodobka 63aad: Tirakoobka Muwaadiniinta Dowladda Koonfurgalbeed

1. Shacabka Dowladda Koonfurgalbeed, tobankii (10) sanno hal mar ayaa la tiri koobi doonaa.
2. Xeer gaar ah ayaa qeexi doono arrimaha la xiriira tiro koobka Dowladda Koonfurgalbeed.

## Qodobka 64aad: Nidaamka Doorashooyinka Dowladda Koonfurgalbeed

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay ku dhaqmeysaa nidaamka Doorashooyinka tooska ah ee hal qof iyo hal cod.
2. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha doorashada, waxa uu xaq u leeyahay in uu wax doorto, isagana la doorto.
3. Xilalka xubnaha Golaha Wakiilada iyo Goleyaasha deegaanka Dowladda Koonfurgalbeed waxaa si toos u dooranaya dadweynaha.
4. Xeer gaar ah uu soo saari doono Golaha Wakiilada Dowladda Koonfurgalbeed ayaa nidaamin doona doorashooyinka Dowladda Koonfurgalbeed.

# CUTUBKA 6AAD: GARSOORKA DOWLADDA KOONFURGALBEED

## Qodobka 65aad: Awoodda Garsoorka

1. Awoodda garsoorka Dowladda Koonfurgalbeed waxaa u xil-saaran Maxkamadaha.
2. Awoodaha iyo waajibaadka heerarka kala duwan ee garsoorka waxaa lagu qeexi doonaa xeer uu Golaha Wakiilada soo saari doono.
3. Dowladda Koonfurgalbeed xil ayaa ka saaran u qareemidda iyo dejinta siyaasado loo dhanyahay oo lagu hor-marinayo garsoorka.

## Qodobka 66aad: Madax-banaanida Garsoorka

1. Garsoorku wuxuu ka madax-banaan yahay hay'adaha Xeer-dejinta iyo fulinta marka uu waajibaadkiisa gudanayo.
2. Xubnaha garsoorku waxay u hogaan samayaan xeerka.
3. Garsooraha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada waajibaadkiisa garsoorenimo.
4. Garsooraha lama baari karo korkiisa ama hoygiisa, hadii aan ogalaasho looga haysan Golaha adeega garsoorka.

## Qodobka 67aad: Habka Dacwad-qaadista Maxkamadaha

1. Dacwad qaadistu waxa ay u furan tahay dhageysiga dadweynaha, hase yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansan karaan in dacwadda lagu dhageysto qol ka xiran dadweynaha sababo la xiriira anshaxa, nabad gelyada iyo badbaadinta marqaatiyaasha.
2. Go'aan maxkamadeed lama gaari karo hadii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo ay ku soo bandhigaan doodahooda iyo cadeeymahooda.
3. Go'aan kasta oo maxkamadeed waa in uu ku qotamo sal sharci.

## Qodobka 68aad: Qaab-dhismeedka Maxkamadaha

1. Qaab-dhismeedka Maxkamadaha Dowladda waxay noqonayaan afar (4) heer oo kala ah:
   - **a.** Maxkamadda daraja 1aad
     - i. Maxkamadda Degmada
     - ii. Maxkamadda Gobolka
   - **b.** Maxkamadda Darajada 2aad
     - i. Maxkamadda Racfaanka
   - **c.** Maxkamadda Darajada 3aad
     - i. Maxkamadda Sare
   - **d.** Maxkamadda Dastuurka

2. Awoodaha iyo waajibaadka heerarka kala duwan ee maxkamadaha, Golaha Wakiilada ayaa xeer kasoo saari doono.

**Qodobka 69aad: Guddiga Adeegga Garsoorka**

1. Dastuurkan wuxuu dhisayaa guddiga adeegga garsoorka.
2. Guddiga adeega garsoorka waa kan ugu sareeya maamulka garsoorka iyo ilaalinta madax bannaanadiisa.
3. Guddiga adeega garsoorka waxa uu ka koobnaan doonaa toddobo (7) xubnood oo kala ah:-
    a. Gudoomiyaha Maxkamadda Sare
    b. Xeer-ilaaliyaha Guud
    c. Labo (2) qareen oo ka imaaneysa ururka qareennada ee Dowladda Koonfurgalbeed.
    d. Seddax (3) qof oo xushmad weyn ku dhex leh bulshada rayidka Koonfurgalbeed oo ay soo jeediyeen Golaha Wasiirada.
4. Kadib soo jeedinta Golaha Wasiirada iyo ansixinta Golaha Wakiilada ee xubnahaasi, Xeer Madaxweyne ayaa lagu magacaabaya Guddiga adeega Garsoorka.
5. Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa gudoomiye ka noqonaya guddiga adeega garsoorka.

6. Muddada xil-heynta Guddiga adeega garsoorka waa shan (5) sano, oo hal mar kaliya la cusbooneysiin karo.
7. Guddiga adeega garsoorka wuxuu sameysanayaa xeer-hoosaadkiisaa u gaarka ah.
8. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa awood u leh magacaabidda, dalacsiinta, beddelidda iyo kala-diridda xubnaha garsoorka Dowladda.
9. Anshax marinta xubnaha garsoorka, waxaa iska leh Guddiga adeega garsoorka
10. Guddiga wuxuu go'aamiyaa mushaarka iyo lacagta howlgabka ee garsoorayaasha.
11. Wuxuu diyaaariyaa hal-beegyada Xeer ee shuruudaha shaqo ee garsoorayaasha iyo u gudbinta hal-beegyadaasi Xeer Wasiirka Cadaaladda si uu horgeeyo Golaha Wasiirada.

### Qodobka 70aad: Maxkamadda Dastuurka

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay dhisaysaa maxkamadda Dastuurka
2. Maxkamadda Dastuurka waxa ay ka koobnaan doontaa garsoorayaasha maxkamadda sare oo lagu kordhiyay afar (4) garsoore oo cusub.
3. Golaha Wakiilada ayaa soo saari doono xeer gaar ah oo lagu qeexi doono qaab-dhismeedka, habka shaqada iyo waajibaadka maxkamadda Dastuurka.

4. Gudoomiyaha maxkamadda sare ayaa noqonaya Gudoomiyaha Maxkamadda Dastuurka.
5. Fadhiga maxkamadda Dastuurku waa caasimadda Dowladda Koonfurgalbeed.

## Qodobka 71aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Shaqo ee Maxkamadda Dastuurka

1. Maxkamadda Dastuurka Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay awood u leedahay:
   a. Burinta guud ahaan iyo qeyb kamid ah Xeer, Xeer-nidaamiye, xeer-hoosaad iyo talaabo maamulkasta oo ka hor imaaneysa shareecada Islaamka iyo Dastuurka.
   b. Fasiraada qodobada Dastuurka.
   c. Xalinta khilaafaadka Dastuuriga ah ee u dhexeeya hay'adaha kala duwan ee Dowladda.
   d. In Golaha Wakiilada ay talo sharci siiso marka uu soo weydiisto.

## Qodobka 72aad: Habka Go'aan gaarista Maxkamadda Dastuurka

1. Maxkamadda Dastuurka waxa ay ku go'aan gaareysaa aqlabiyad cod hal dheeri (50+1) ah

2. Go'aanada maxkamadda Dastuuriga ah waa in dadweynaha loo gudbiyaa.

## Qodobka 73aad: Maxkamadda Sare ee Dowladda Koonfurgalbeed

1. Maxkamadda Sare ee Dowladda Koonfurgalbeed waa tan ugu saraysa maxkamadaha caadiga ah
2. Maxkamadda Sare waxa ay leedahay awoodda qaadista:
3. Go'aan ka gaarista dacwadaha xukunkooda uu kasoo dhamaaday maxkamadaha ka hooseeya.
4. Dacwadaha maamulka ah oo iyagu toos uga bilowda Maxkamdda Sare.
5. Fadhiga Maxkamadda Sare waa Caasimadda Dowladda Koonfurgalbeed.
6. Maxkamadda sare waxa ay dacwadaha ku qaadi kartaa meel kasta oo ka mid ah deeganada Dowladda Koonfurgalbeed.
7. Tirada Garsoorayaasha Xubnaha Maxkamadda Sare waa Todoba (7) Xubnood oo kala ah:
    a. Gudoomiye
    b. Garsoorayaal Lix (6) ah

## Qodobka 74aad: Magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare

1. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa magacaabaya Gudoomiyaha Maxkamada Sare ee Dowladda Koonfurgalbeed.

## Qodobka 75aad: Shuruudaha Magacaabista Gudoomiyaha Maxkamadda Sare

1. Qofka loo magacaabayo gudoomiyaha maxkamadda sare waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
   - **a.** In uu yahay Muslim, ku dhaqma Diinta Islaamka
   - **b.** Muwaadin u dhashay Dowladda KGS
   - **c.** In da'diisu aanan ka yareyn 40 sano
   - **d.** In xukun ciqaabeed kamadambeys ah aysan maxkamad ku ridin
   - **e.** In uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed oo la xiriirta shareecada Islaamka iyo qaanuunka.
   - **f.** In uu leeyahay khibrad iyo waayo-aragnimo la xiriirta shaqada garsoorka.

## Qodobka 76aad: Xil ka qaadista Guddoomiyaha Maxkamadda Sare

Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa awood u leh xil ka qaadista gudoomiyaha maxkamadda sare.

## Qodobka 77aad: Magacaabista Xeer ilaalinta Guud

1. Xeer ilaaliyaha guud iyo ku-xigeenadiisa waxaa magacaabaya Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed.
2. Xeer ilaalinta guud waxa ay ka koobantahay:
   a. Xeer ilaaliyaha Guud
   b. Ku-xigeenada xeer ilaaliyaha.

## Qodobka 78aad: Shuruudaha Magacaabista Xeer ilaaliayaha Guud

1. Qofka loo magacaabayo xeer ilaaliyaha guud waa in buuxiyaa shuruudaha soo socda:
   a. In uu yahay Muslim, ku dhaqma Diinta Islaamka
   b. In uu yahay muwaadin u dhashay Dowladda KGS.
   c. In aysan maxkamad horay ugu ridin xukun faldambi ciqaabeed
   d. In da'diisu aanan ka yaran 40 sanno

e. In uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed oo la xiriirta shareecada islaamka iyo qaanuunka
f. In uu leeyahay Khibrad shaqo oo garsoorka la xiriirta.

## Qodobka 79aad: Xil ka Qaadista Xeer ilaaliyaha Guud

Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa awood u leh xil ka qaaadista hogaanka xeer ilaalinta guud.

## Qodobka 80aad: Xarunta Xeer ilaalinta

1. Xarunta xeer ilaalinta waa Caasimadda Dowlada Koonfurgalbeed.
2. Awoodda xeer ilaalinta guud waxa ay ku fidsantahay dhammaan deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed oo dhan.

# CUTUBKA 7AAD: GOLAHA ODAYAASHA DHAQANKA

## Qodobka 81aad: Golaha Odayaasha Dhaqanka

Golaha odayaasha dhaqanka KGS waa gole dhaqan oo ka kooban hogaamiyayaasha beelaha deegaanada Koonfurgalbeed, oo hoostaga Wasaaradda Arimaha Gudaha Dowladda KGS.

## Qodobka 82aad: Xilka /Waajibaadka Golaha Odayaasha Dhaqanka KGS

**1.** Golaha odayaasha dhaqanka Dowladda KGS waxa ay leeyihiin waajibaadka hoos ku xusan;

- **a.** Ka shaqeynta nabadda iyo maslaxadda umadda Koonfurgalbeed
- **b.** Horumarinta Dhaqanka suuban ee ku saleysan Shareecada Islaamka
- **c.** Xallinta khilaafaadka beelaha dhexdooda
- **d.** Ka shaqeeynta arrimaha dib-u-heshiinta guud ee deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed.
- **e.** Ka qeybgalka dedaalada dib-u-heshiinta beelaha Soomaaliyeed ee walaalaha ah.

## Qodobka 83aad: Habmaamuuska Golaha Odayaasha Dhaqanka Dowladda KGS

1. Golaha Odayaasha dhaqanka waxa ay yeelanayaan qaddarin iyo hab-maamuus u gaar ah.
2. Si nabad-gelyadooda xil-gaar ah la isaga saaro, xubin kasta waxay xaq u leedahay in loo ogolaado haysashada hub fudud oo sharciyeysan.

## Qodobka 84aad: Xuquuqda Golaha Odayaasha Dhaqanka Dowladda KGS

1. Golaha Odayaasha dhaqanka Dowladda Koonfurgalbeed waxay leeyihiin xuquuqaha hoos ku xusan;
   - **a.** Gunno billeed joogto ah
   - **b.** Daryeel Caafimaad
   - **c.** Daryeel/ka warqab Amni

# CUTUBKA 8AAD: BAAHINTA MAAMULKA HEER GOBOL IYO DEGMO

## Qodobka 85aad: Baahinta Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxay ku dhaqmeysaa mabaadi'da baahinta maamulka heer gobol, heer degmo, deegaan iyo heer tuulo.
2. Golaha Wakiilada ayaa soo saari doono xeer gaar ah oo lagu nidaaminayo dhismaha dowladaha hoose.

## Qodobka 86aad: Magacaabista Maamulka Gobolada

Kadib, soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Gudoomiyaha maamulka Gobolka iyo ku-xigeenadiisa waxaa magacaabaya Madaxweynaha Dowladda KGS.

## Qodobka 87aad: Wax-Kabedelka Qaab-Dhismeedka Gobolada Iyo Degmooyinka Dowladda KGS

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay ka koobantahay gobollo, degmooyin, deegaano iyo tuulooyin.
2. Dhismaha gobolada, degmooyinka, xuduudahooda iyo darajooyinkooda waxaa

nidaaminaya xeerar gaar ah oo Golaha Wakiiladu ay soo saaraan.

**3.** Xukuumadda Dowladda Koonfurgalbeed ayaa awood u leh sameynta iyo soo kordhinta gobolo iyo degmooyin cusub iyada oo la raacayo shuruudaha ku xusan xeerar uu soo saari doono golaha Wakiilada dowladda Koonfurgalbeed.

# CUTUBKA 9AAD: SHAQAALAHA DOWLADDA

## Qodobka 88aad: Ilaalinta Shaqaalaha

1. Dowladdu waxa xil ka saaran shaqo abuurista iyo tayeynta xirfadda iyo tababaridda shaqaalaha
2. Waxaa reeban shaqaalaysiinta qasabka ah hadii aan si kale u tilmaamin Xeerka.
3. Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo mushaar iyo gunno udhiganta shaqada uu qabanaayo.
4. Shaqaale kasta wuxu xaq uleeyahay fasaxyada ku xusan xeerarka u degan dowladda Koonfurgalbeed.
5. Shaqaalaha Dowladdu waxay xaq u leeyihiin in ay cabashadooda kusoo bandhigaan banaanbaxyo nabadeed ama shaqo joojin markii laga reebo ciidamada si waafaqsan xeerarka shaqaalaha.
6. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu u tartamo shaqa kasta oo uu buuxin karo shuruudaheeda.

## Qodobka 89aad: Daryeelka Shaqaalaha Dowladda

1. Qofkasta oo kamid ah shaqaalaha Dowladda KGS, wuxuu leeyahay xaqa hawl-gabnimada

2. Qofkasta oo kamid ah shaqaalaha Dowladda wuxu xaq uleeyahay daryeel hadii ay dhibaato soo gaarto, oo uu xanuunsado.

### Qodobka 90aad: Xeerarka Shaqaalaha

1. Golaha Wakiilada ayaa soo saari doono xeerarka:
    1. Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda Koonfurgalbeed
    2. Xeerka Shaqaalaha aan dowliga aheyn ee Dowladda Koonfurgalbeed
    3. Xeerka howl-gabka shaqaalaha Dowladda Koonfurgalbeed.

# CUTUBKA 10AAD: DHULKA, HANTIDA, DHAQAALAHA IYO KHEYRAADKA DABIICIGA AH

### Qodobka 91aad: Dhulka.

1. Dhulka Waa kheyraadka koowaad ee Dowladda iyo saldhiga nolosha.
2. Dhulka waa in loo haystaa, loona adeegsadaa, loona maamulaa si cadaalad ah, waxtar leh, wax soo saarna leh.
3. Dowladda waa in ay dejiso siyaasad dhuleed oo ilaalineysa xaquuqda lahaanshaha dhuleed ee soo jireenka ah, waafaqsan sharuucda iyo xeerarka Dowladda Koonfurgalbeed iyo kuwa DFS, si joogta ahna dib u eegis loogu sameeyo.
4. Dowladda Koonfurgalbeed waa in ay xaqiijiso:
    - **a.** U sinnaanshaha fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa.
    - **b.** Damaanad qaadista xuquuqda lahaanshaha dhulka iyo diiwaan gelinta
    - **c.** In si deg deg ah oo lagu wada qanci karo loo xalliyo khilaafaadka ka dhasha dhulka iyo hantida.
    - **d.** In la xaddido dhulka uu qof ama shirkad yeelan karaan
    - **e.** In Dowladda xaqiijiso ka faa'iideysiga dhulka si waafaqsan mabaa'di'da ka faa'iideysiga dhulka ayadoon dhibaato loo geysaneyn.

f. In la nidamiyo dhaqdhaaqaaqa suuqa ka ganacsiga dhulka, si looga hortago ku takri falidda milkiilayaasha dhulka ee yar yar.

5. Lama bixin karo isticmaal dhuleed oo abiddi ah.

### Qodobka 92aad: Kala Gadashada Hantida Umadda

Waxaa reeban kala gadashada iyo iibinta hantida guud ee ummadda.

### Qodobka 93aad: La wareegidda Hantida Gaar ahaaneed

1. Dowladda waxay la wareegi kartaa hantida gaar loo leeyahay dan guud awgeed.
2. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya hantida danta guud darteed loola wareegayo.
3. Dowladdu waxay bixineysaa mag-dhaw u dhigma hantida lala wareegayo isla markaasna ku qanacsan yahay milkiilaha.
4. Hantida maguurtada ah, mid qaran iyo mid gaar ahaaneedba ee milkiilaheedu uu maqan yahay, ama aysan jirin cid wakiil u ah, waxaa daryeelkeeda iyo ku dhaqankeedaba mas'uul ka ah Dowladda.
5. Hantida loola wareegay dan guud ee hadana lagana maarmay waxaa loo celinayaa qofkii asal ahaan lagala wareegay, iyada aan magdhowga laga celin.

## Qodobka 94aad: Habka dhaqaalaha Furfuran ee Dowladda Koonfurgalbeed

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay ku dhaqmeysaa habka dhaqaalaha suuqa xorta ah
2. Waxay hirgalineysaa, damaanadna siineysaa maalgelinta deegaanadeeda, maalgashadayaasha wadaniga ah iyo kuwa caalamiga ah
3. Habka ganacsiga waa tartan furan
4. Waxaa reeban talaabo kasta oo ka hor imaanaysa tartanka ganacsiga.

## Qodobka 95aad: Daryeelka Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah

Dowladda waxa ay mamnuuceysaa:

1. Xaalufinta iyo nabaad guurinta deegaanka bad, barri iyo hawada.
2. Ka ganacsiga, dhoofinta dhuxusha, dhirta qoyan iyo tan qalalanba.
3. Dhoofinta Xoolaha dhedigga ah
4. Ka ugaarsiga xad-dhaafka iyo dhoofinta Duurjoogta, Golaha Wakiilada ayaa xeer kasoo saari doono.
5. Dastuurka waxa uu mamnuucayaa deegaameynta meelaha aan ku haboonayn.

6. Kheyraadka dabiiciga ah ee Dowladda Koonfurgalbeed waa hanti ay leeyihiin dadka reer Koonfurgalbeed
7. Kheyraadka dabiiciga ah ee deegaanada Dowladda Koonfurgalbeed waa in looga faa'deystaa si Xeerka waafaqsan.
8. Ilaalinta iyo ka faa'ideysiga ah kheyraadka dabiiciga ah waxaa masuul ka ah Dowladda Koonfurgalbeed.
9. Dowladda Koonfurgalbeed ayaa awood u leh bixinta ruqsadaha ka faa'deysiga ah kheyraadka dabiiciga ah.
10. Golaha Wakiilada ayaa xeerar gaar ah kasoo saari doono arrimaha la xiriira deegaanka iyo ka faa'ideysiga kheyraadka dabiiciga ah.

# CUTUBKA 11 AAD : CIIDAMADA DOWLADDA KOONFURGALBEED

## Qodobka 96aad: Ciidamada Dowladda Koonfurgalbeed

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay yeelaneysaa qeybaha kala duwan ee ciidamada hoos ku xusan;
   a. Ciidamada Booliiska
   b. Ciidamada Booliska gaarka ah
   c. Ciidamada Nabad-Sugidda
   d. Ciidamada Asluubta
2. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa ah Taliyaha Guud ee dhamaan noocyada kala duwan ee Ciidamada Dowladda.
3. Madaxweynaha Dowladda Koonfurgalbeed ayaa awood u leh magacaabista iyo dalacsiinta taliyayaasha/hoggaanada ee Ciidamada Dowladda.
4. Golaha Wakiilada ayaa xeerar kasoo saari doono qaab dhismeedka, waajibaadka, nidaamyada iyo xuquuqda Ciidamada Dowladda Koonfurgalbeed.

# CUTUBKA 12AAD: XIRIIRKA DOWLADDA KOONFURGALBEED IYO DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## Qodobka 97aad: Wadashaqeynta Dowladda KGS iyo DFS

1. Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay la yeelaneysaa Dowladda Federaalka xiriir wadashaqeneyd oo ku dhisan mabda'a Federaaliga ee iskaashiga iyo istaageeridda.
2. Dowladda KGS waxay madaxbannaani buuxda u leedahay is-maamulkeeda gudaha ah.
3. Dowladda KGS iyo DFS Soomaaliya waxa ay kawada hadli doonaan arrimaha la xiriira;
   a. Qeybsiga awoodaha
   b. Wadaagga kheyraadka dabiiciga
   c. Arrimaha sugidda amniga iyo nabadgalyada
   d. Hannaanka maaliyadda
   e. Hannaan Garsoorka
   f. Qaab dhismeedka Dowladda Federaalka
   g. Hannaan Doorashooyinka iyo Axsaabta siyaasadeed
   h. Arrimaha jinsiyadda
   i. Dhameystirka Dastuurka Dalka
4. Haddii ay dhacdo in madaxda DFS ay awoodahooda u adeegsadaan si baalmarsan Dastuurka KMG ah ee dalka, Dowladda KGS

waxa ay xaq u leedahay in ay dib-u-eegis ku sameyso xiriirka wadashaqeynta ee kala dhexeeya DFS.

5. Dowladda KGS waxa ay adkeyneysaa in arrimaha masiiriga ah ee dalka loo waajaho qaab wadaxaajood iyo wadar ogol ah.
6. Dowladda Federaalka waa in DXDF ay kala tashataa arrimaha la xiriira heshiisyada caalamiga.

## Qodobka 98aad: Xiriirka Dowladda KGS iyo Dowladaha Xubnaha ka ah DFS

1. Dowladda KGS waxa ay xiriir wadashaqeyn kala yeelaneysaa DXDF dhinacyada soo socda:
    a. Iskaashi amni
    b. Iskaashi ganacsi
    c. Arrimaha horumarinta beeraha, daaqa iyo biyaha
2. Haddii uu yimaado khilaaf la xiriira xuduudaha DXDF; waxaa kawada xaajoonaya dowladaha ay khuseyso, iyada oo DFS ay dhexdhexaadin doonto.
3. Hadii wada-xaajoodka ay ku guuleysan waayaan, waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

# CUTUBKA 13AAD: WAX-KA-BEDELKA, KAABIDDA IYO ANSIXINTA DASTUURKA

## Qodobka 99aad: Wax-kabeddelka iyo Kaabidda Dastuurka

1. Wax-ka-bedelka ama kaabidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara;
   - **a.** Mooshin sababeysan oo ay soo gudbiyaan ugu yaraan Soddon (30) xubnood oo ka tirsan Xildhibanaada Golaha Wakiilada.
   - **b.** Soo jeedin wax ka beddel ama kaabid Dastuur oo sababeysan oo ka timaadda xukuumadda Dowladda KGS
   - **c.** Codsi wax ka beddel ama kaabid oo ay saxiixeen ugu yaraan Shan kun (5,000) oo kamid ah muwaadiniinta reer KGS
2. Soo jeedinta kadib, guddoonka Golaha ayaa guddi gaar ah u xilsaaraya falanqeynta, dib-u-eegista iyo xaqiijinta in soo jeedinta ay ku fadhiso qodobo Dastuuri ah, intaas kadib Guddiga warbixintooda waxa ay kusoo celin doonaan Golaha Wakiilada muddo kooban guddeheeda.
3. Kadib dooda Golaha ee warbixinta Guddiga, soo jeedinta wax-ka bedelka/kaabidda Dastuurka, waxa uu Goluhu ku aqbalaya cod

hal dheeri (50+1) guntanka xubnaha Golaha Wakiilada Dowladda KGS.

**4.** Si loo xaqiijiyo xog ogaalnimada iyo ka warqabka dadweynaha ee arrimaha waxka-bedelka/kaabidda Dastuurka, Goluhu waxaa waajib ku ah in uu qabto olole wargelin oo dadweynaha lagu ogeysiinayo soo jeedinta wax kabdedelka/kaabidda Dastuurka.

## Qodobka 100aad: Ansixinta Wax-ka-bedelka iyo Kaabidda Dastuurka

**1.** Muddo bil gudaheeda, soojeedinta waxka-bedelka/kaabidda Dastuurka waxaa la horgeynayaa Golaha Wakiilada si ay ugu meelmariyaan ama ugu diidaan cod seddex meelood labo meel (2/3) tirada guud ee Golaha Wakiilada.

**2.** Wax ka beddelka qodobada 1aad ilaa 8aad ee cutubka 1aad ee Dastuurka Dowladda Koonfurgalbeed haddii loo maro habraaca sare ku xusan ee qodobkan, waxa loo bandhigaya afti dadweyne si uu u dhaqangalo.

**3.** Dastuurka markii uu ansixiyo Golaha Wakiilada, wax ka bedel ama kaabid laguma sameyn karo muddo labba kal-fadhi ah gudahood.

**4.** Kadib meelmarinta soo jeedinta wax ka badelka/kaabidda Dastuurka waa in lagu baahiyaa faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

## Qodobka 101: Iswaafajinta Dastuurka Dowladda KGS iyo Dastuurka KMG ee DFS

1. Dastuurka Dowladda KGS waxaa la waafajin doonnaa Dastuurka JFS, kadib marka uu soo dhamaado Geedi-socodka dhameystirka iyo dib-u-eegista Dastuurka KMG ah ee qaranka.
2. Inta laga soo gabogabeynayo geedi-socodka dib-u-eegista iyo dhameystirka Dastuurka KMG ah ee JFS, isla markaana la is waafajinayo dhamaan Dastuurka JFS iyo Dastuurada DXDF; Dowladda Koonfurgalbeed waxa ay ku dhaqmeysa awoodaha uu siinaya Dastuurkeeda gaarka ah.

## Qodobka 102aad: Aftida Dastuurka

1. Dastuurka Dowladda Koonfurgalbeed, waxaa loo qaadi doonnaa afti dadweyne, kadib iswaafajinta Dastuurka KMG ah ee JFS iyo Dastuurada Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya.
2. Xeer gaar uu soo saari doono Golaha Wakiilada Dowladda KGS ayaa faahfaahin doono nidaamka iyo habraaca aftida dadweynaha.

## Qodobka 103aad: Dhaqangalka Dastuurka

1. Dhaqangalka Dastuurka waxa ay ka bilaaneysa marka uu Golaha Wakiilada ansixiyo, isla

markaana Madaxweynaha Dowladda KGS uu kusoo saaro xeer, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

2. Dastuurka waxa uu yeelan doonnaa dhaqangal kumeel gaar ilaa inta laga helayo afti dadweyne.

## Qodobka 104aad: Nuqulka Rasmiga

Nuqulka rasmiga ah ee Dastuurka Dowladda Koonfurgalbeed waa nuqulada ku qoran Afsoomaali (Maay & Maxaatiri).

SOUTH WEST STATE OF SOMALIA

# DASTUURKA DOWLADDA KOONFURGALBEED SOOMAALIYA